JamhuuriyaddaFederaalkaSoomaaliya
BaarlamaankaFederaalkaSoomaaliya
GolahaShacabka

Hadal-qoraalkakalfadhiga 5-aad
Documentiga Kul.5-aad/kul.6-aad 01/11/2014

Kalfadhiga 5-aad

Kulankiisa 6-aad Saac,11:15gh.Saac.Xir 12:55gd

Guntinta(Quorum) 149 Xil.

Ajendaha:

1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka
2. Ansixinta Ajendaha
3. Akhrinta warbixinta Xisaab-xirka 2013
4. Warbixinta guddiga Difaaca ee Hishiiska Talyaaniga iyo Soomaaliya
5. Warbixinta Guddiga Arimaha Gudaha, Maamulada Gobolada iyo Aminiga
6. Iyo wixii kale

Shir-Guddoomiye Guddoomiye Ku=xigeenka 2-aad Mudane Mahad Cabdalla Cawad

Waxaa shirka furay Guddoomiye Ku/xigeenka 2-aad Mudne Mahad Cabdalla Cawad, waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka ah uuna akhriyay Xil. Sheekh Shaacir.

Guddoonka wuxuu sheegay inuu xisaab-xirka daahay loona baahanyahay in la meel mariyo, intaa kadibna wuxuu u yeeray guddoomiyaha Cusub ee Guddiga Maaliyadda Mudane Samaan Sheekh Daahir,

Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda wuxuu sheegay in Guddiga Maaliyadda loo soo gudbiyay xisaab-xirka 2013 Tar. 18 jun 2014, wuxuu kaloo sheegay inay la kulmeyn Wasaaradda Maaliyadda 4 jeer Hanti-dhooraha guudna 4 jeer Bangiga dhexeo o 1 jeer, Wasiirka Arimaha Dibadda 1mar, 11kalena waxay la galeyn Hay'ado kale, Guddigana uu yeeshay 24 kulan si uu waajibkiisa u guto. Intaa kadib wuxuu u mahad celiyay Hanti-dhooraha Guud, WasaaraddaMaaliyaddaiyoBangigadhexe,wuxuunasheegayinuuwarbixintaxisaa-xirka 2013 uu akhrinaayo Xil. Cusmaan Xaaji Cali Xoghayaha Guddiga. Xil. Cusmaan Xaaji Cali wuxuu akhriyay xisaab-xirka 2013, wuxuuna sheegay in guddiga uu ku soo gabagabeeyay in arimaha la xiriira miisanaaniyadda Dowladda la waafaajiyo talooyinka hoos kuqoran.

1. In daqliga ay qabtaan hogaanka socdaalka iyo jinsiyadda lagu qabto buugaagta lacag qabashada ee ka diiwaangashan xafiiska xisaabiyaha Guud ee Dowladda kadibna ay ku xareeyaan Bangiga dhexeee Dowladda.
2. In la joojiyo canshuur dhaafka aan sharciga waafaqsaneyn
3. Qandaraasyada la galaayo loo sameeyo qiimo go'an, lagana soo diiwaangaliyo xafiiska hantidhoorka guud.
4. In badeecadaha ka soo daga degedda lagu xareeyo baqaarka si loo hubiyo loona canshuuro, maadaama ay dhici karto in ay sida maraakiibta doonyaha badeeco dheeri ah ama kuwa amniga wax u dhimi kara.
5. In la joojiyo lacagaha lagu shubu shirkadaha gaarka ah sida Dahabshiil iyo Salaam Bank.
6. In la joojiyo qarashka laga galaayo daqliga kahor intaaan lagu xareyn Bangiga dhexe.
7. In qarashka aan loo heynin awood qarash bixin (**expenditure Warrant**) aan la gali galin
8. Qarashkastana waa in laga bixiyaa madax-xigihii loogu talagalay, waa in aan la dhaafin awooda qarashka madaxa-xigaha
9. In shaqaalaha ajanabiga ah ee ka xoogsada Dalka, hadii ay yihiin dad ka shaqeeya shirkado, mashaariic ama hey'adaha Dowladda dulsaarka ku ah, waa in wasaaradda maaliyadda habeeysaa sidii looga soo qaadilahaa canshuurta ku waajibtay ee laxiriirta mushaarooyinka ay qaataan dhaqaalaha ayaga ah.

Hadaba dhammaan caqabadahaas waxaa looga gudbi karaa wadashaqeyn dhexmarta hay'adha iskana kaashadaan sida loo wada illaalin lahaa nidaamka iyo shuruucda u degsan maamulka xisaabaatka Dowladda

10. In Rukta ganacsiga laga joojiyo lacagta loo jaro ee sharcidarada 1%
11. Waa in la adkeeyaa wareegtadii xafiiska hanti-dhoorka guud ee ahayd in la joojiyo qidmadaha ay jartaan hay'adaha daqliga qabta.
12. Waa in dhamaan hay'adaha Dowladda loo sameeyaa xisaabiyayaal idman si loo xafido documentiga lacagahii hore loo isticmaalay.

Guddoomiyaha Golahawuxuu u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Difaaca Xuseen Carab Ciise, wuxuuna akhriyay warbixinta Guddiga Difaaca ee ku saabsan hishiiska Talyaaniga iyo Soomaaliya, kdibna wuxuu ku wareejiyay akhrinta warbixinta Xoghayaha Guddiga mudane, Maxamed Xuseen Xagaafe.

Mudane Xagaafe wuxuu akhriyay warbixinta hishiiska Talyaaniga iyo Soomaaliya, wuxuuna sheegay markii hishiiskaan loo soo gudbiyay ay qodobo qaar ka saxeyn kuna saxeyn habqoraalah.Qod.3-aad xaga tababarka ciidamada iyo raashiinkooda iyo in la helo Taankiyo iyo Diyaarado wuxuu ku soo gabagabeeyay in hishiiska ay isku afgarteyn labada dhinaba.

Guddoomiye K/xigeenka 2-aad wuxuu sheegay in dib loo dhigay warbixintii Guddiga Arimaha Gudaha maamulada Gobolada iyo Amniga in fadhiga xiga ay akhrin doonaan.

Xil. Kulalihi wuxuu sheegay in uu jidka oo inooxiranyahay,wuxuuna sakangareeyay Xil. Xiis Muuse wuxuuna soo jeediyay in shacabka kacaan oo anaga kaliya nagu haleynin.

Xil. Maxamud Cabdi Becos, wuxuu sheegay gobollada loo sameynaayo maamulada ,ay kamaqantahay doorkii Xildhibaanada loona baahanyahay in la holo dib u shiisiin dhab ah. Waxaa jirta in Xildhibaanada ay kawarhaayaan xaalada dib u hishiisiinta Dalka, wuxuu Xil.ka codsaday in arinkaan faragalin lagu sameeyo.

Xil. Xuseen Carab Ciise, wuxuu hoosta ka xariiqay hadaladii Xiisi yoXil. Kulilihi, wuxuuna u mahadcaliyay Guddiga, wuxuu intaa ku daray in dadka ku takrifalay hantid aQaranka in lala xisaabtimi doono.

Xil. BashiirMaxamed wuxuu sheegay markii la sameynaayo maamul-goboleed marka hore la dhameystiro Dastuurka waxaana ku jiroq odobo loo baahanyahay in la badalo iyo in Dastuurka la saxo si loo qabto kuwa ku xadgudbay sharciga.

Xil. Muuse Sheekh Xumar wuxuu sheegay in ay jirto dhibaatooyin farabadan, wuxuuna Guddoonka kacodsaday in la soo dadajiyo Guddigii isku dhafahaa ee ka koobnaa Guddiga Garsoorka iyo Guddiga Amniga iyo Gobolada, wuxuu intaa ku daray in M/weynaha JFS uu tagay Gobolka Gedo uuna soo jeediyay in gar gaar lala soo gaaro.

Xil. Shaacir wuxuu u mahadcaliyay Guddiga Maaliyadda iyo Qorsheynta wuxuuna soo jeediyay in Guddiga maaliyadda iyo Hay'addaha Dowladda ee ku shaqadaleh ay dabagalaan dadka kumaqan hantida qaranka.

Xil. Shashiif Maxamed Cabdalla wuxuu sheegay in uu taageersanyahay Xil. Xiis wuxuuna soo jeediyay in hoos loo hadlo, wuxuuna Guddoonka kacodsaday in la siiyo 3-maalmood ay si hoos ahaan u hadlaan runtana laysu sheego.

Xil. AweyswuxuukahadlaydhinacaamnigaGuddoonkanawuxuusheegay in arinkaanuuyahay mid soonoqnoqotay inXildhibaanada ay imaawaayeenshaqadooda, wuxuunasheegay in ay haboontahayarinkaaninuunoqdo mid albaabada u xiran.

Xil. Maryan Cariif Qaasin waxay sheektay in Guddiga Dastuurka laga soo weydiiyay meelo badan Qod,100 –aad iyo Qod. 90-aad ee Dastuurka waxayna sheektay inuu Baarlamaanka ku sameyn doono (Amendment) waxaa kaloo Guddiga la sooweydiiyay maxaad wax uga qaban weydeyn qilaafka ka dhaxeeya madaxda sare, waxaan u sheeknay in labada Guddi ee kala ah Guddiga Dib u eegista ee Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa- Banaan ee Dastuurka ey iska kaashadeynayna wax ka qabteyn Dastuurka.

Xil. Maxamed Xasan C/llaahi wuxuu sheegay in uu soo dhaweynaayo in si hoos ahaan loo hadlo, qaraxyadii dhacay waxaa ku baaba'ay dad badan waxaana la qabtay konteernaro oo waxyaalaha qarxa ka buuxa wuxuu soo jeediyay in inta maqana ladaba galo.

Guddoomiyaha wuxuu sheegay in albaabada la xiro si ay u wada hadlaan.Wuxuu kaloo sheegay in fadhigaxiga in hishiiska talyaaniga iyo Soomaaliya iyo xisaab-xirka soo jeedinta Guddiga maaliyadda inn la meelmariyo.

Kalfadhiga 5-aad kulankiisa 6-aad uu shir-Guddoominayay Guddoomiye Ku/xigeenka 2-aad mudane Mahad Cabdalla Cawad, wuxuus heegay inuu shirka xiranyahay saacadda markey eheyd 12:55gd.